East Hill Elementary School
2024-2025

Kaliya Isticmaalka Xafiiska:
Taariikhda La Helay/Geliyay: _____

Macluumaadka Ardayga

Magaca Hore: _____ Magaca Danbe: _____ MD: _____

Taariikhda Dhalashada: _____ Fasalka: _____ Aqoonsiga Ardayga: _____

Jinsiyada/Asalka:
☐ Aasiyaan
☐ Caddaan
☐ Indiyaan Amerikaan ama u dhashay Alaaska
☐ Madow ama Afrikaan Ameerikaan
☐ LaboJjinsiyad ama ka Badan
☐ Hisbanik ama Latino
☐ Dhalad Hawaaiyan ama Jasiiradaha Baasifigga
☐ MA doonayo inaan bixiyo macluumaadkaas

Sinji: ☐ Lab ☐ Dheddig ☐ Kale ☐ MA doonayo inaan bixiyo macluumaadkaas

Xaaladda Qadada: ☐ Bilaasha ama La dhimay ☐ Qiime Buuxa ☐ MA doonayo inaan bixiyo macluumaadkaas

Ilmahaagu hadda ma helaa Adeegyada Luqadda Ingiriisiga (ELL)? ☐ Haa ☐ Maya

Ilmahaagu ma leeyahay IEP ama Qorshaha 504? ☐ Haa ☐ Maya

Ilmahaagu ma ku leeyahay wax xasaasiyado ah (cuntada, latex, daawada, iwm ...)? ☐ Haa ☐ Maya
Haddii ay "Haa" tahay fadlan noo sheeg xasaasiyadda iyo sharax raadkeeda:

Fadlan noo sheeg wixii xannibaad cuntada (caafimaadka, diinta, iwm ...)? ☐ Haa ☐ Maya

Ilmahaagu ma leeyahay wax xaalado caafimaada/dhaqano ah oo saameyn ku yeelan ka qaybgalka barnaamijkan? Haddii ay "Haa" tahay fadlan sharax: ☐ Haa ☐ Maya

Ilmahaagu hadda ma qaada wax daawo ah? ☐ Haa ☐ Maya
Haddii ay "Haa" tahay fadlan tax:

Ma weydiin karnaa kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga inay eegto qorshaha caafimaadka ee ilmahaaga? ☐ Haa ☐ Maya

Macluumaadka Waalidka/Wakiilka

Magaca Danbe: _____ Magaca Hore: _____ Xiriirka: _____

Cinwaanka: _____ Magaalada/Gobolka/Zipka: _____

Luqada Koowaad ee ku hadlo: _____ Ciiwaanka Iimaylka: _____

Lambarka Telefoonka: _____ Lambarka Telefoonka:Kale: _____

Macluumaadka La xiriirada Degdegga ah

Magaca Lala Xariirayo:	Xiriirika:	Lambarka Lagala Xariiro:	Lambar Kale:
_____	_____	_____	_____
_____	_____	_____	_____

Qaabk Bixinta La Doorbiday

Barnaamijka Kadib, Ilmahayga waxa uu (*sax dhamaan kuwa ku munaasabka ah*):
☐ U Lugayn Doonaa Guriga ☐ La qaadi doonaa ☐ Raaci Doonaa Baska Shaqaynaya ☐ Wax Kale: _____

Wixii macluumaad dheeraad ah, nagala soo xidhiidh:
Terrence Gile – tgile@psesd.org |Office: (253) 778-7695

Gaadiidka

Barnaamijka dugsiga kadib ee CCLC 21aad oo la kaashanaya waaxda gaadiidka Degmo Dugsiyeedka ayaa ka dhigi gaadiidka dugsiga ee ardayda mid ay heli karaan aryada horay loogu ogolaaday (iyadoo lagu salaynayo siyaasadda gaadiidka ardayda degmada). Ardayda ku nool gudaha gacan socodka degmada, ama aan rabin in ay ka faa'iidaystaan barnaamijka gaadiidka degmadu ansixisay inay bixiso; gaadiidkooda waxaa mas'uul ka ah waalidka/mas'uulka ardayga.
Barnaamijka dugsiga kadib ee CCLC 21aad ma aqbalayaan mas'uuliyadda, kamana saarna wax mas'uula dhaawaca jidhka ama hantiyeed ee soo gaara ardayda loo ogol yahay gaadiidka laakiin aan isticmaalin adeegan, ama arday kasta marka la sii daayo barnaamijka marka uu dhammaado.

Saxiixa Waalidka/Wakiilka: _____

Bixinta Oggolaanshaha iyo Uqoolanaanta | PSESD

Anigoo ah waalidka ama wakiilka ardayga codsanaya inuu si iskood ah uga qeybgalo Barnaamijka dugsiga kadib ee 21st CCLC, Waxaan halkan ku qirayaa in aan akhriyay, fahmay oo ogolaaday waxyaabahaan soo socda:
·Waxaan halkan ku bixiyey oggolaansho ah inuu ilmahayga ka qeybgalo Barnaamijka 21st CCLC ee dugsiga kadib.
·Waxaan fahansanahay in barnaamijka 21st CCLC ee dugsiga kadiba, Puget Sound Educational Service District (PSESD), saraakiisha, wakiilada, shaqaalaha, mutadawiciinta iyo hay'adaha shuraakada ay yihiin ee la xiriira barnaamijka dugsiga kadib inay samayn doonaa dhammaan wixii suuraggal ah si ay u siiyaan badbaado iyo ammaan ardayda, laakiin waa fahmi karaa in ay jiraan khataro gaar ah oo la xidhiidha ka qaybgalka hawlaha la soo jeediyay oo aan la baajin karin.
·Hawlaha la soo jeediyay waxa ka mid ah, laakiin aanay ku xaddidnayn cilmi barashada fassalada ardayda, ciyaaro, hawlo, ciyaarta dibada iyo safaro dibadeed.
·Waxaan qirayaa in hawshaan leedahay khatarta la garanayo oo la fili karo, kuwaas oo keeni kara dhaawac jireed ama niyadeed, qallal ama dhimasho, iyo sidoo kale dhaawac ku yimaada hantida, ama dhinac saddexaad oo kale. Waxaan fahamsanahay inaan khatartaan si fudud loo wada suulin karin iyada oo aan carqalado la gelin tayada muhiim ah ee waxqabadka.
·Waxaan caddeynayaa in ilmahaygu aanu qabin wax xaalado caafimaad ama jireed ah, oo faragelin karaa isaga ama iyada ammaankooda hawshaan.
·Waxaan u ogolaaday in xirfadlayaasha caafimaadka degdegta ah aqoonta u leh ay baaraan iyo haddii uu yimaado dhaawac ama cudur halis ah, siiyaan daryeelka degdegga ah ardayga magaciisu kor ku xusan. Waxaan fahamsanahay in dadaal kasta la samayn doonaa si la ii soo xiriiriyo oo la iigu sharaxo nooca dhibaatada soo gaartay mudada ka horaysa daaweynta.
Haddii ay dhacdo in ay lagama maarmaan noqoto in shaqaalaha barnaamijka masuulka ka ah uu siiyo daryeelka degdegga ah ardaygayga, midna asaga ama iyada, iyo barnaamijka 21 st CCLC ee dugsiga kadib, Puget Sound Educational Services District (PSESD) saraakiisha, wakiilada, shaqaalaha, mutadawiciinta, hay'adaha ay shuraakada yihiin ee xiriirka la leh barnaamijka dugsiga kama qaadayaan mas'uuliyad dhaqaale wixii kharashyo ah ee ka yimid shilka, dhaawac, xanuun iyo/ama duruufaha lama filaanka ah.

Saxiixa Waalidka/Wakiilka: _____

Ka saamixida Mas'uuliyadaha Magaalada Kent

Waxaan qaadanayaa dhammaan khataraha iyo halisaha ka dhalan kara ka qaybgalkayga barnaamijka nasiinada. Waxaan intaas dheer, waxaan ka cafinayaa masuuliyada qof kasta oo i siinaaya gaadiidka i gaynaaya igana keenaaya nashaadaadka. Haddii uu dhaco dhaawac ama waxyeelo la xariirta ka qaybgalkayga, waxaan halkaan ka cafinayaa aana ka eed tirayaa Magaalada Kent, saraakiisheeda la doortay iyo kuwa la magacaabay iyo shaqaalaha, abaabulayaasha, maal geliyaha, kormeeraha, ama mutadawac la xariira barnaamijka waxaana ka eed tirayaa sheegashooyin kasta, dhaawacyo, waxyeelo, khasaaro, ama dacwad, ayna ku jiraan qarashka qareenka, ee ka dhasha ama la xariira barnaamijka, ayna ku jirto khatarta kasta ama waxyeelo ka dhalata ka qaybgalkayga inta lagu jiro aafada COVID-19. Waxaan aqbalay: (i) inaan ku dhaqmo taxadaro kasta oo badqabka ah oo ay soo rogaan abaabulayaasha munaasabada si looga hortaga aafada COVID-19 ee jirta, (ii) inaan si kalsooni leh uga jawaabo su'aal kasta oo la xariirta dhaawac ka dhasha COVID-19, iyo (iii) inaanan ka qaybgelin wax munaasabad ah haddii anigga ama qof ku nool gurigayga uu waajahaayo astaamaha COVID-19 ama uu dhawaan la joogay qof laga helay caabuqa COVID--19. Markaan la helin saxiixa, bixinta qarashka iyo ka qaybgalka barnaamijka ayaa ku filan aqbalaada shuruudaha ku qoran beri yeelidaan. Waxaan si buuxda ugu fasaxayaa Magaalada Kent inay adeegsato sawiro kasta, cajalado duuban, sawirada dhaqdhaqaaqa, xogta la duubay, ama diiwaan kasta oo kale oo barnaamijkaan leeyahay lana xariira adeegsiga kasta ee xogeed ama xayiisiineed ee magaalada Kent

Saxiixa Waalidka/Wakiilka: _____

Wixii macluumaad dheeraad ah, nagala soo xidhiidh:
Terrence Gile – tgile@psesd.org |Office: (253) 778-7695

Ogolaanshaha Masawirka iyo Fiidiyowga | PSESD

Ilmahaagu wuxuu ka qayb qaadanaya Barnaamijka 21st CCLC ee dugsiga kadib oo ay bixiyaan Puget Sound Educational Service District (PSESD). Waxaan ka codsanaynaa ogolaanshahaaga si aanu u isticmaalno masawirrada ilmahaaga, iyo/ama muuqaalada dhawaaqa iyo fiidiyowga uu kujiro ee qoraallada hay'adaheena iyo website-ka. Muuqaallada fiidiyowga waxaa loo isticmaali karaa janaalada telefishinka dadweynaha/ganacsiga, degmo dugsiyeedka ama PSESD, iyo/ama waxyaabaha qoraalka. Dhammaan maqaalladeena iyo sawiradeenu waxay muujiyaan ardayda iyo barayaasha oo muuqaal fiican. PSESD waa hay'ad waxbarashada dadweynaha Gobolka Washington ah oo u adeegta dugsiyada Degmooyinka King iyo Pierce iyo Bainbridge Island. Boggeena intarnetka ee waa www.psesd.org.
Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah, fadlan kala xiriir Xafiiska Isgaarsiinta ee PSESD, 425-917-7681 ama lmichelle@psesd.org.
Marka aad saxiixdid warqadaan waxaad ogolaatay sidan soo socota: Waxaan ku bixinaya oggolaansho in sawirada ilmahayga iyo/ ama maqalka iyo fiidiyowga laga duubo ee ah muuqaal, qoraal, iyo/ama dib ugu soo daabicidda bogga intarnetka dadweynaha ee Puget Sound Educational Service District, iyo macluumaadka kale iyo waxbarashada la xariirta Puget Sound Educational Service District. Magaca ilmahayga LOOMA isticmaali doonaa xaaladaha kor ku xusan haddii aanay oggolaansho gaar ah iga codsan shaqaalaha PSESD. Oggolaanshahaan wuxu ka fasaxayaa dhammaan wixii mas'uuliyado ah ee ka iman kara ka qayb qaadashada Puget Sound Educational Service District. Wixii ka noqosho ah ee quseeya ogolaashahan waa in lagu bixiyaa si qoraa ah.

Saxeexa Waalidka/Koriyaha: _____

Wixii macluumaad dheeraad ah, nagala soo xidhiidh:
Terrence Gile – tgile@psesd.org |Office: (253) 778-7695

Ogolaanshaha in la Wadaago Diiwaannada| PSESD

Puget Sound Educational Service District (PSESD) waxay jeclaan lahaayeen in ay soo ururiyaan xog ku saabsan waxqabadyada iyo dhacdooyinka ka dhacaya barnaamijyada dugsiga la xiriira sida uu u fasaxo wakiilka rasmiga ah ee ka shaqeeya barnaamijyada waxbarashada CCLC 21st. Xeerka Xuquuqda Waxbarasho ee Qoyska iyo Asturnaanta (FERPA) ayaa ka doonaya Xarumaha Waxbarashada Qarniga 21aad (CCLC 21aad) inay ka helaan ogolaansho qoraal ah waalidka, masuulka kahor inta aanay sii deyn wax kasta oo ah macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee ku saabsan ardayga.

Macluumaadka la codsaday waxaa loo isticmaali doonaa, inay buuxiyaan shuruudaha warbixinta sannadlaha ah ee Gobolka iyo federaalka iyadoo ay sabab u tahay in la sii wado helitaanka maalgelinta gobolka iyo dowladda dhexe, si ay u wadaan barnaamijka, ulana socdaan wax ku oolnimada iyo loo xisaabiyo saameynta uu ku leeyahay CCLC 21aad hanashada ardayda, si loo hagaajiyo CCLC 21aad, iyo in la siiyo taagyeero waxbarasho iyo gargaar ardayda.

Bixinta Diiwaanadda: Saxiixidayda foomkan, waxaan ku siinaya dugsiga uu dhigto ilmahayga oggolaansho ah inay siiyaan Puget Sound ESD 21 CCLC macluumaadka soo socda: Macluumaadka Dadka* oo ay ku jiraan taariikhda dhalashada, lambarrada aqoonsiga dugsiga, SSID (Aqoonsiga Ardayga ee Gobolka), koox jinsiyadeedka/qowmiyadeed, jinsiga, heerka fasalka, aqoonta Ingiriisiga, uqalmida qadada bilaashka ah ama qiimaha jaban, xaaladda baahida gaarka ah iyo macluumaadka kale ee dadka * xogta qiimaynta Ardayga oo ay ku jiraan dhibcaha imtixaanka, fasalada iyo imaanshaha dugsiga* macluumaadka la soo ururiyey iyada oo sahan ama wada hadaladaada, ilmahaaga iyo macalimiinta ilmahaaga ee ku saabsan horumarka ilmahaaga iyo ka qaybgalka hawlaha CCLC 21aad

Xadadka shaacinta: Waxaan fahamsanahay in bixinta macluumaadka ay soo buuxin doonaan xaaladahan: Puget Sound ESD 21 CCLC ma doondooni doonaan in la sii daayo macluumaadka ka baxsan xogta ku qeexan foomkan. Warbixinada shaqsiyanka ee ardayga lama siin doono dadweynaha iyo magaca ama macluumaad lagu aqoonsan karo ilmahaaga looma isticmaali doono wax warbixin ah. Macluumaadka iyo jawaabaha su'aalaha shakhsiyeed ee ilmahaaga waxaa loo kaydin, wareejin, iyo maareeyn doona si amaan ah iyo loo ogol yahay inay arkaan tiro kooban oo shaqaale loo ogol yahay oo kaliya. Dhammaan diiwaanada ay ku jiraan macluumaadka aqoonsi ee shakhsiyeed waa la baabbi'in doonaa dhammaadka mudada warbixinta.

Dib-u shaacinta dhinacyada kale: Waxaan sidoo kale ku siiyo ogolaansho in CCLC 21aad in ay dib ugu shaaciso macluumaadka dhinacyadaan soo socda ee soo buuxiyay shuruudaha warbixinta qasabka: * Xafiiska Gobolka Washington ee Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) doorkiisa ah bixiyaha miisaaniyadda gobolka ee barnaamijka iyo ururka ay u doorteen inay noqdaan qiimeeyaha CCLC 21 st ee gobolka oo dhan.

Muddada heshiiska: Waxaan fahamsanahay in heshiiskan uu ahaanayo mid dhaqangal ah dhammaan inta uu ka diiwaan geshan yahay ardaygayga CCLC 21st ama ilaa qoraal joojina laga helayo. Heshiiskan waxaa la joojin karaa wakhti kasta iyadoo codsi qoraal ah, taariikhaysan ahna mid saxeexan marka laga reebo marka uu CCLC 21st uu haray ugu dhaqmay oggolaanshahan. Dib ula noqosho qoraal ah waa in loo soo diraa isku duwaha dugsiga kadib. ***Waan akhriyey macluumaadka kor ku xusan oo waxaan oggolaaday ilmahayga inuu ka qeybgalo qiimaynta barnaamijka CCLC 21st. Haddii aad qabto wax su'aalo ah fadlan la xiriir iskuduwaha dugsiga kadib.**

*** Anshaxa maalinta dugsiga.**

Saxeexa Waalidka/Koriyaha: _____

Magaca Saddexan ee Ardayga: _____

Wixii macluumaad dheeraad ah, nagala soo xidhiidh:
Terrence Gile – tgile@psesd.org |Office: (253) 778-7695